


## Cadaadiska Dhiigga ee Sareeya (Dhiig-kar)

Qof kasta wadnihiisu waa bambo riixaysa dhiigga oo ku wareejinaysa jidhka. Taasi waa sababta marka maqaarku jeexmo uu dhiiggu u soo baxo, sababta oo ah wadnaha ayaa soo rixaya. Dhiiggu waxa uu maraa xididada arooriyeyaasha iyo halbowleyaasha loo yaqaano, sida biyo dhex maraya tuubo.




Haddii halbowluhu yahay nadiif oo uu isku siman yahay waxa uu wadnuhu u riixi karaa dhiigga si dhakhso ah oo fudud.



**Normal Artery**

Haddii halbowluhu uu wasakh noqdo oo dhexdiisa furani yaraato, dhiigga socodkiisu ama qulqulkiisu wuu gaabinayaa. Ka dibna waa in wadnuhu u shaqeeyo si ka sii xoog badan si uu dhiiggu u socdo ama u qulqulo.



**Blocked Artery**

Marka wadnuhu xoog u shaqeeyo waxa sare u kaca cadaadiska dhiigga. Wadnuhu hore ayuu u madhan karaa marka uu sidaa xoog ugu shaqeeyo, ama mid ka mid ah arooriyeyaasha ama halbowleyaasha ayaa dilaaca oo dhiigga ku sii daaya jidhka dhexdiisa. Haddii taasi ka dhacdo maskaxda, waxa la yidhaahdaa faalig (stroke). Marka dadka uu faalig ku dhaco waxa imanaysa in si dhakhso ah ay u waayeen awoodda socodka ama hadalka. Badanaa waxay yeeshaan dhibaato joogto ah oo ka haysata isticmaalka hal dhinac oo ah jidhkooda.



Marmarka qaarkood halbowle ayaa si buuxda u xidhma waxana joogsada dhiiggii tagayay qaybtaa jidhka ah. Haddii taasi ka dhacdo agagaarka wadnaha waxa la yidhaahdaa wadne qabasho (heart attack) ka dibna wadnuhu waxa uu joojiyaa shaqada. Haddii taasi dhacdo qofku dhakhso ayuu u dhiman karaa.



Cudurka wadnaha waxa loogu yeedhay “dilaa aamusan” sababta oo ah dad badan ayaan lahayn wax calaamado ah ilaa maalinta uu ku dhaco faalig ama wadne qabasho, wakhtigaasina waa goor dambe oo aan waxba la qaban karin. Si looga hortago goor hore cudur wadnaha ah waxay dhakhaatiirtu marwalba hubiyaan cadaadiska dhiigga. Waxa kale oo ay bukaanka weydiiyaan haddii ay jiraan waalid ama xubno kale oo qoyskooda ka tirsan oo qaba cudur wadnaha ah, sababta oo ah cudurka wadnaha iyo cadaadiska dhiigga ee sareeya waxay noqon karaan hidde qoys leeyahay, sida indhaha dugulka ah ama cago yaryar.



Marka dadku sii gaboobaan waxa soo kordha suurogalka inay yeeshaan cadaadis dhiig oo sareeya. Dadka qaarkii haddii ay cayilaan waxa taasi u keeni kartaa cadaadis dhiig oo sareeya. Cudurada sida sonkorta/sonkorowga (kaadi-macaan) ayaa sidoo kale sababi kara cadaadis dhiig oo sareeya. Dumarka qaarkood waxay yeelan karaan cadaadis dhiig oo sareeya marka ay uurka leeyihiin.



Cadaadiska dhiigga waxa marwalba la cabiraa laba jeer, marka wadnuhu dhiigga riixayo iyo marka uu nasanayo. Sidaa daraadeed warbixin kasta oo cadaadis dhiig waxay leedahay tiro sare iyo tiro hoose. 120 sare iyo 80 hoose weeye cadaadiska dhiig ee ugu sareeya ee caafimaad leh. Marka cadaadiska dhiiggu ka sareeyo 120 tirada sare ama ka sareeyo 80 tirada hoose waxa markaa uu yahay mid aad u sareeya.



Haddii cadaadiska dhiiggu uu si joogto ah u sareeyo, waxa uu dhakhtarku ku talin karaa in la qaato dawo hoos u dhigta.



Miisaanka oo aad iska yareysid iyo jimicsi dheeraad ah oo aad samaysid ayaa kaa caawin kara in cadaadiska dhiiggaagu hoos u dhaco, isla markaana dadka qaarkood waxa waxtara ama caawiya milixda oo ay iska yareeyaan.

